

Gawracatada

Waa maxay gawracatadu?

Gawracatada waa cudur ka dhasha bakteeriya la yiraahdo *Corynebacterium Diphtheriae*. Bakteeriyadaan waxay ku jirtaa afka, dhuunta iyo sanko qofka caabuqa qaba.

Gawracatadu waxay soo saartaa sun khatar badan (sun) taasoo waxyeelaysa unugyada iyo jirka oo dhan.

Sidee dadku ku qaadaan gawracatada?

Bakteeriyada keenta gawracatadu waxay ku jirtaa afka, dhuunta iyo sanko qofka caabuqa qaba. Bakteeriyadaan ayaa si fudud ugu faafta dadka kale marka qofku qufaco ama hindhiso faniinada qoyaanka oo raacaaya hawada.

Waa maxay astaamaha gawracatadu?

Astaanta koobaad ee gawracatadu badanaa waa dhuun xanuun iyo inay wax liqistu kugu adkaato.

Astaamaha kale ee guud waa qandho heer hoose ah, lalabo, matag, madax xanuun iyo wadne garaac saa'id ah.

Gawracatada ayaa keeni karta dibaato kaa qabsata wax liqida, neefsi la'aanta, wadne fashilka iyo baralaati.

Dhibaatooyinka waxaa ku jira

- Fashilka wadnaha
- Baralaati
- Dhibaatooyinka daran ee neefsiga
- Dhibaato dhanka wax liqida ah
- Dhimasho.

Gawracatadu waa xanuun aad u daran. Dadka qaba gawracatada 1 kamid ah 20 kii qof way u dhintaan.

Yay tahay inuu qaato talaalka gawracatada?

Gawracatada ayaa looga hortagi karaa talaal.

Talaalka gawracatada ayaa la siiyaa carruurta ayadoo qayb ka ah 6 talaal oo ku wada jira 1 talaal markay jiraan 2, 4 iyo 6 bilood jir.

Talaalka 6 ku jirta 1 ka talaal ayaa ka hortaga gawracatada, Cagaarshoowga B, Hib (Hargabka Haemophilus b) Jix-dheerta (Xiiqda) Dabaysha iyo Teetanada.

Kuurada talaalka oo xoojin ah ayaa la siiyaa ilmaha markay gaaraan 4-5 sano kuwaasoo qayb ka ah [4 talaal ee ku wada jirta 1 talaal](#) kaasoo kahortaga Gawracatada, Jix-dheerta (Xiiqda), Dabaysha iyo Teetanada.

Kuuro kale oo xoojin ah ayaa la siiyaa sanadka 1^{aad} ee dugsiiga heerka labaad kaasoo qayb ka ah [talaalka Tdap](#) wkaasoo kahortaga Gawracatada, Jix-dheerta (Xiiqda), Dabaysha iyo Teetanada.

Haddii cunugaagu u baahan yahay talaal, ama aadan hubin xaalada talaalka cunugaaga, la xiriir GP gaaga si uu talo uu kuu siiyo.

Aad ayay muhiim u tahay in ilmaha laga talaalo gawracatada waxaa jiray dad laga helay gawracatada wadamada UK iyo wadamada EU sanadkii hore wayna soo laaban doonaan haddii aan dadku qaadan talaalka.

Yay tahay inuusan qaadan talaalka gawracatada?

Waxaa jira dad dhawr ah oo ay tahay inaysan qaadan talaalka gawracatada. Cunugaagu waa inuusan qaadan talaalka haddii uu xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday kuuro hore oo kamid ah talaalka ama qayb kamid ah talaalka.

Waxa aad filanayso marka aad qaadato talaalka gawracatada?

Kadib qaadashada talaalka, cunugaaga ayaa dareemi kara xanuun, gaduudasho ama barar ka fuula meesha cirbada looga dhuftay. Waxaa laga yaabaa inay cuncunto uuna qandho leeyahay.

Haddii sidaan dhacdo waxaad siin kartaa baristamool ama ibuprofen. Waa inaad soo kale siisaa biyo badan. Xaqiiji inauusan aad u diiranayn iyo inaan dharku xoqayn meesha cirbada looga muday.

Ilmaha ayaa caadiyan kasoo bogsooda ciladahaan fudud maalin ama labo gudahood

Ilmaha talaalka buuxa qaba,

- 1 kamid ah 10 kii qof ayaa dareemaaya xanuun, gaduudasho iyo barar ka fuulaaya meesha cirbada looga dhuftay ama qandho yeelanaaya.

Ciladaha daran ayaa aad dhif u ah.

Sidee talaalka gawracatadu u shaqeysaa?

Talaalka gawracatada ayaa difaacaaya ilmaha asagoo siinaaya difaac ka dhan ah sunta keenta astaamaha xanuunka, halkii ay difaaca ka bixin lahayd bakteeriyada qudheeda. Maadaama ay ladagaalanto sunta, waxaa la yiraahdaa toxoid.

Waa sidee saamaynta talaalku?

HSE National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaran ee HSE)

Kuurada buuxda ee talaalka ayaa ka difaacaysa gawracatada 95% dadka. Dadka qaatay talaalka buuxa ee gawracayada ayaa wali sidi kara bakteeriyada oo ku jirta dhuuntooda. Tan ayaa ka dhigan in, inkastoo ay difaac haystaan ay wali ku faafin karaa bakteeriyada dadka aan qaadan talaalka iyo ilmaha dhashay.

Xagee ayaan ka helayaa xog dheeraad ah?

La hadal xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay oo booqo www.immunisation.ie